


SHAQOYINKA MAANTA IYO BERRITO



Ontario

MIISAANIYADDA ONTARIO EE
2016



ontario.ca/budget

DHAQAALAHA ONTARIO AYAA KOB CAYA OO ABUURAYA SHAQOYIN

Muhiimaddayada kowaad ayaa ah inaan kobcino dhaqaalaha oo aan abuurno shaqooyin. Caddaynta inuu qorshahayagu shaqaynayo:

- Kobaca dhaqaalaha Ontario ayaa hadda ka tallaabo dheereynaya koritaanka qaranka, oo la filayaa inay ku sii waddo ahaanteedda kuwa ugu xoogga badan Kanada labada sano ee soo socota.
- Ontario ayaa abuurta in ka badan 600,000 shaqooyin ilaa dhaqaale hoos u dhacii 2009 oo waxa la saadaalinayaa in la aburo in ka badan 300,000 oo shaqooyin dheeraad ah ilaa dhammaadka 2019, iyada oo ka dhigaysa wadarta shaqo abuurista in ka badan 900,000 saafi ahaan shaqooyin cusub ilaa in muddo 10-sano ah.

Markay tahay 2015–16, difisidka ayaa la saadaalinayaa inuu noqodo \$5.7 bilyan iyada oo ka yar \$2.8 bilyan sidii la saadaliyay *Miisaaniyaddii 2015*. Dowladda ayaa saadaalinaysa inuu difisidku noqdo \$4.3 bilyan gudaha 2016–17.

Ontario ayaa dheellitiri doonta miisaaniyadda sanadaha 2017-18, isla markaa iyada oo ku sii wadda maalgelinta kicisa kobaca dhaqaalaha iyo abuuritaanka shaqooyinka.



BULSHO CADAALAD AH: U ABUURITAAN FURSADO REER ONTARIO

Reer Ontario dhammaantood ayaa u mudan inay helaan fursadda kartida waxqabadkooda oo buuxda. Qorshahayaga ayaa ka caawinaya dadku inay guulaystaan annaga oo:

- Horumarina adeegyada loogu talagalay carruurta iyo dhallinta qabta ootismka iyada oo loo marayo maalgashi shan sano iyo \$ 333 milyan ah.
- U fidina dad ka sii badan si hore marin u hel guriyayn ku filan oo la awoodi karo iyada oo loo marayo maalgelin seddex-sano iyo \$178 milyan ah, iyada oo qayb ka mid ah Xeeladda Guriyaynta La-Awoodi karo ee Muddada-dheer.
- Ka shaqayna inaan ku joojino guri-la'aanta joojtada ah gudaheeda 10 sano.
- Joojina colaadda lagu qaado haweenka Asaliga ah iyada oo loo maro xeelada muddo-dheer ah.
- U kordhina saamiga gargaarka bulsheed ilaa boqolkiiba 1.5 dadka qaangaarka ah ee qaata Ontario Works iyo dadka naafanimada leh ee ku tiirsan Barnaamijka Taageerada Naafanimada ee Ontario, iyada oo u kordhin la siiyo kuwa saamiyada gargaarka bulsheed ee ugu hooseeya leh.



IYADA OO LAGA DHIGO KULIYADDA IYO JAAMICADDA KUWO LA AWOODI KARO OO MARIN LOO HELI KARO

Laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2017-18, Ontario ayaa ka dhigaysa waxbarashada kuliyadda iyo jaamacadda kuwo la awoodi karo oo marin loo heli karo annaga oo adeegsana qorshahayaga u diyaarinta arday ka badan sidii hore shaqooyinka berrito. Waxaan maalgashanaynaa xoog-shaqaalaha heerka sare u xirfadaysan ee berrito maanta annaga oo:

- Beddelna gargaarka ardayga si aan uga dhigno lacagta waxbarashada celcelka ah lacag la'aan u noqon doontaa ardayda baahida lacageed leh ee ka soo jeeda qoysaska u dakhligoodu yahay \$50,000 ama u ka hooseeyo, oo lacagta tacliinta ayaa u noqon doonta mid ay awoodi karaan qoysaska dakhli-dhexaadka leh.
- Siina deeqo dib-uma-bixin ah — oo ka badan doonta lacagta waxbarashada celceliska ah — in ka badan 50 boqolkiiba ardayda ka soo jeeda qoysaska leh dakhliga \$83,000 ama in ka hooseysa.
- Hubina in ardayda ka soo jeedda qoysaska leh dakhliga sannadlaha ah ee ka yar \$50,000 ayna yeelan doonin deyn arday goboleed.
- Kordhina marin u helka deynaha dulsaar la'aanta ah ama qiimahoodu hooseeyo qoysaska dakhli-dhexaadka iyo dakhli-sarehaba.
- U fidina taageerada lacageed ardayda mudakarka ah iyo reerka lehba.
- Hubina in dhammaan ardaydu noqon doonaan si la mid ah sidii hore ama ay ka fiicnaan doonaan sida ku hoos qoran Deeqda Lacagta Waxabarshada Ontario.
- Horumarina marinka ay u helaan tacliinta sare iyo tababaritaanka waxbartayaasha First Nation, Métis iyo Inuit iyada oo maro maalgashiga socda ee saddexda-sano iyo \$97 milyan ah.



KA DHIGIDDA NOLOSHA MAALIN KASTA MID FUDUD

Qorshahayaga ayaa ah inaan uga dhigno noloshu maalin kasta mid fudud reer Ontario annaga oo hoos u dhigna kharashyada oo toosina habboonaanta iyo xulashada:

- Annaga oo yarayna khidmadaha gaadiid dhigashada ku dallaca in ka badan \$10 maalintii isticmaalyaasha sida badan u taga isbitaalka.
- Annaga oo ka takhalusna khidmadda \$30 ee qaac-siidaynta Drive Clean.
- Annaga oo u kaydina isticmaalaha caadiga ah ee korantada annaga oo ka qaadna ku dallaca deynta hawlgabka \$70 ah, laga soo bilaabo Janawari 1, 2016.
- Annaga oo kordhina u habboonaanta iyo xulashada adeegsadhaha iyada oo lagu iibiyo khamri canabka, biirta iyo saydharka dukaammada cuntada gobolka oo dhan.
- Iyada oo la yareeyo qiimaha caymiska gaadiidka darawallada Ontario ee ka badan 9.5 milyan.
- Annaga oo ka caawina 37,000 oo qoys qaban inay u dib ugu fiirsi tamar iyo waxyaabo ku rikibka guryahooda iyada iyada oo loo maro Green Investment Fund, si loo yareeyo biilashooda tamarta.
- Iyada oo looga dhigo tallaalka shingles lacag la'aan waayeeelka reer Ontario ee da'doodu 65 ilaa 70 tahay ee mutaysta —iyada oo \$170 u kaydsanto.
- Iyada oo la yareeyo wakhtiyada socdaalka oo loo habboonaysiyo socdaalka iyada oo la hirgeliyo Regional Express Rail (Xadiid Degmeed Degdeg ah), iyada oo la horumariyo adeegyada GO Transit oo lagana hirgaliyo nidaamka kaarka nooliga PRESTO gaadiidka Toronto transit.



ABUURITAANKA SHAQOYINKA MAANTA IYO BERRITO

Qorshahayaga Ontario ayaa dhabaynta muhiimaddayada kowaad ee ah kobcinta dhaqaalaha abuuritaanka shaqooyinka annaga oo:

- Ku samayna maalgashiga ugu wayn kaabayaasha dadwaynaha ee taariikhda Ontario — \$160 bilyan in muddo 12 sano ah — iyada oo taageerta in ka badan 110,000 shaqooyin, celcelis ahaan, sannad kasta.
- Maalgashana teknoolojiyadaha nadiifta ah si loo abuurro shaqooyin oo lala dagaallamo isbeddelka cimilada.
- Ku maalgashana \$2.7 bilyan Raasamaalaynta Shaqooyinka iyo Barwaaqada muddo ah 10 sano, iyo abuurka iyo haysiga in ka badan 16,000 shaqooy ilaa markaa.
- Ka caawina shirkadaha fidinta dhoofinta oo wax soo saarkoodu ka sii bato marka loo maro Xeelladda Dhoofinta Caalami Noqoshada ee marka hore saddexda-sano iyo \$30 milyan ah.
- Kordhina baratanka caalamiga ah ee meheradha Ontario iyada oo loo maro Hindisaha Koritaanka Meheradda ee shanta-sano iyo \$400 milyan.

DHEERAAD KA OGOW HALKAN
ONTARIO.CA/BUDGET

TELEFOON LACAG LA'AAN AH: 1-800-337-7222

TTY LACAG LA'AAN AH: 1-800-263-7776